MACLUUMAAD FAAHFAAHSAN OO KU SAABSAN QODOBADA HESHIISKA KIRADA GURIGA

Dhukumentigani waa fasiraad loogu talogalay masuulka saxeexaya heshiisyada kiraynta guryaha ee lala gelayo Kristiansand Boligselskap KF ee khuseeya guryaha laga kiraynayo dadka jilicsan, oo ku salaysan xeerka kiraynta guryaha juska 9 iyo §11-1. Heshiiska kiraynta ayaa u dhexeeya labada dhinac. Dhukumentigan waxa loogu talogalay inuu faahfaahiyo qodobadiisa kala duwan.

0. Xogta shakhsiyeed

Magaca iyo lambarka dhalashada kiraysta(-ha/-yaasha), lambarka moobaylka, iimaylka, inta qof ee degaysa guriga.

1. Shayga la kiraynayo

Macluumaad sharaxaad ah, iyo macluumaad la gelin karo diiwaanka dadweynaha.

2. Halka xeerka kiraynta guryuhu ka soo gelayo

Macluumaad ku saabsan xeerka khuseeya heshiiska. Caadi ahaan ma laga baydhi karo qodobada xeerka kiraynta guryaha. Taasoo macnaheedu yahay in aan lagu heshiin karin waxa yaraynaya xuquuqda xeerkaasi siiyey qofka. Laakiin heshiiskani waxa uu khuseeyaa guryaha loogu talogalay dadka jilicsan ee in guryo helaan ku adagtahay. Taasoo macnaheedu yahay in heshiisku ka koobanyahay qodobo xadidaya xuquuqda aad leedahay marka la barbardhigo heshiis kiro oo caadi ah.

3. Muddada jiritaanka heshiiska

Macluumaad ku saabsan muddada heshiisku jirayo. Haddii lagu heshiiyey muddo ka yar 3 sanno waxa ku ag qoran sababta loogu heshiiyey wakhti ka yar inta caadiga ah, oo ah saddex sanno. (Sheeg: tusaale ahaan in qofka degan aanu awloodin in deganaado guriga ama la qabsado shuruudaha lagu xidhayo qofka guriga degaya, ama in kiraystuhu u baahanyahay guri ku meel gaadh ah oo uu ku sugayo guri kale)

4. Wareejinta guriga

Marka aad la wareehaysid guriga waa in la habeeyey, nadiifiyey oo uu ku sugan yahay xaalad caadi ah.

Haddii aanad ku qancin in gurigu ku suganyahay xaalad caadi ah ama aan la habayn/nadiifin, waa inaad sida ugu dhakhsaha badan u ogeysiisid Boligselskapet (Shirkadda Guryaha). Waxa haboon in ogeysiinta noocaas ahi ahaato mid qoraal ah. Haddii aad wakhti badan la daahdid, waxa kaa lumi kara xaqa aad leedahay.

5. Lacagta kirada guriga iyo wax-ka-beddelkiisa

5.1 Lacagta kirada guriga

Kirada guriga waxa aad bixinaysaa bil kasta. Waxa ku jira kirada ama dheeraadka ku ah kirada (sida korontada, kulaylka).

Waxa laguu dhiibayaa foomka korontada oo aad usbuuc gudahii u soo celinaysid Boligselskapet.

Waa inaad gashid caymiska alaabta iyo agabka guriga. Waa caymiska alaabtaada (dharka, alaabta, qalabka iwm). Waa muhiim. Haddii aanad gelin caymiska alaabta guriga waxa dhici karta in aan lagu siin magdhow haddii shil ka dhaco guriga (dab, biyo furmay, tuugo iwm). (eeg qodobka 6.3)

5.2 Bixinta kirada guriga

Xisaabta/faktuurada u horeysa waxay la socotaa heshiiska kirada. Xisaabta waxa ka muuqda muddada, KID lambarka iyo akoonka baanka.
Caadi ahaan waa in kirada la bixiyo ugu dambeyn 20-ka bil kasta.
Waa inaad saxeexdid heshiis ah *avtalegiro* (in lacagta toos loo goosto). Taasoo ka dhigan in kirada guriga si toos ah looga goosanayo akoonka marka la gaadho xilligeeda.
Boligselskapet ayaa diraysa foomka heshiiska.

5.3 Wax-ka-beddelka kirada guriga

Kirada waa la beddeli karaa sannad kasta iyadoo lagu jaangoynayo kor u kaca qiimayaasha, laakiin in ugu yaraan hal sanno la sugo marka la saxeexo heshiiska. Waa in ogeysiin qoraal ah laguu soo diro ugu yaraan 1 bil ka hor xilliga wax-ka-beddelka. Xilligan la joogo waa in ogeysiintu ka soo horeyso 1/12. Waxay khuseysaa labada dhinacba.

5.4 La mid dhigista qiimaha suuqa

Markay ay socoto ugu yaraan labo iyo badh sanno, waxa kirada lala mid dhigi karaa qiimaha suuqa. Si ay kiradu ula mid noqoto inta lagu kireeyo guryaha la midka ah. Waa in ogeysiin qoraal ah laguu soo diro ugu yaraan 6 bilood ka hor xilliga wax-ka-beddelka. Xilligan la joogo waa in ogeysiintu ka soo horeyso 1/7. Waxay khuseysaa labada dhinacba.

6. Waajibaadka kireeyaha muddada kirada

6.1 Degaansho iyo nidaam

Kireeyaha waxa ku waajib ah ilaalinta deganaanshaha iyo nidaamka.

6.2 Masuuliyadda dayactirka ee saaran kireeyaha

Kireeyaha waxa ku waajib ah dayactirka dhinaca dibedda iyo dayactirka aanad ka ahayn masuul. Dayactirka aad masuulka ka tahay waxa lagu sharaxay qodobka 7.5.

6.3 Masuuliyadda magdhowga ee saaran kireeyaha

Kireeyaha waxa mararka qaar waajib ku noqon kara inuu ku sii magdhow, tusaale ahaan haddii ay suurtogeli weydo inaad guriga la wareegtid xilligii lagu balamay.

Ma codsan kartid in laguu magdhabo khasaaraha dadban. Tusaale ahaan khasaaraha alaabtaada ka soo gaadhay dab, daad, masiibo dabiici ah iwm. Inkastoo aanad lahayn khaladka shilka haddana ma lagu siinayo magdhow, mana ka codsan kartid shirkadda guryaha. (eeg qodobka 5.1).

7. Waajibaadka kiraystaha muddada kirada

7.1 isticmaalka kiraystaha

Guriga waxa loogu talogalay keliya in guri ahaan loo isticmaalo.

Waa muhiim inaad ilaalisid guriga, iyo inaad u isticmaashid qaab aan burbur ku keenayn guriga ama qalabka. Haddii aad dhaawac soo gaadhsiisid guriga, waxa waajib kugu noqonaya inaad bixisid magdhow (qodobka 8). Dhaawaca lama samaynayo ilaa inta

kireeyuhu kaa helayo damiin/balanqaad ku saabsan inaad bixinaysid samaynta khasaaraha (qodobka 7.5). Waa iman karta in guriga lagaa saaro (qodobka 11).

Waxa iyana muhiim ah in haddii khasaare ku yimaado guriga inaad u soo sheegtid kireeyaha sida ugu dhakhsaha badan, eeg qodobka 7.6.

7.2 Degaansho iyo nidaam, waajibaadka ku dhaqanka xeerarka guryaha

Guri kasta waxa uu leeyahay xeerar ku saabsan nidaamka, oo u sii dheer madnuucista iyo waajibinta ku taxan qodobkan:

- Degaansho habeen wakhtiga u dhexeeya saacadaha 23.00 iyo 07.00
- Waxa madnuuc ah gacan-ka-hadal iyo hanjabaado
- Waxa madnuuc ah maandooriyaha sharcidarada ah iyo waxyaalaha kale ee sharcidarada ah (tusaale ahaan xayawaanka meelaha kale ka yimi)

Waa muhiim inaad akhrisatid xeerarka nidaamka ee guriga. Ogow in dad kale kula deganaan karaan guriga, iyo inaad masuul ka tahay tixgelintooda. Iyana waxa aad masuul ka tahay in dadka ku soo booqdaa ku dhaqmaan xeerarka nidaamka.

Ku xadgudubka xeerarka nidaamka guriga waxay keeni karaan magdhow, laalista heshiiska kirada iyo guri ka saaris.

7.3 Madnuuca in sigaar lagu cabo gudaha

Lama oggola in sigaar lagu iscticmaalo guriga, daaqada, ama meelo kale oo gudaha ah. Waa inaad ilaalisid in dadka ku soo booqdaa ku isticmaalin sigaar.

Haddii aad sigaar ku isticmaashid gudaha, waxa dhici karta inaad bixisid wixii khasaare ah ee ka yimaada sigaarka.

7.4 Xayawaanka guryaha

Lagama oggola guriga. (ey, bisad ama xayawaan kale)

7.5 Masuuliyadda dayactirka ee saaran kiraystaha

Qodobkan waxaad ka helaysaa macluumaad ku saabsan masuuliyadda dayactirka ee aad leedahay. Waa inaad ilaalisid guriga oo aad si taxadar leh u isticmaashid. Waxa aad masuul ka tahay dayactirida:

- Qufulada alaabada
- qsabadaha
- suuliga
- meelaha fiilada la geliyo iyo meelaha nalalka laga demiyo
- haanta biyaha kulul
- alaabta iyo qalabka aan ka mid ahayn dhismaha
- dayactirka iyo kabistatalaajada/qasaalada/shoolada iyo qalabka bamka kuleelka
- dayactirka sheegaha/bigilka dabka iyo qalabka dab-demiska

Masuuliyadu waa ilaalinta in qalabku shaqaynayo, taasoo ka dhigan in aad si joogto ah u eegtid in qalabku u shaqaynayo sidii la rabay. Tusaale ahaan waa in sheegaha/bigilka dabka la tijaabiyo lagana beddelo bateriga.

Dhinaca dibedda waxa aad masuul ka tahay:

- jarista cawska
- jarista/gaabinta dhirta
- gurista qashinka iwm.
- Baraf gurista iyo jay ku daadinta iwm.
- ka qaybgalka hawlaha iska-wax-u-qabso (guryaha saamileyda iyo iskaashatada)

Ku xadgudubka masuuliyadda dayactirku waxay kugu keeni kartaa masuuliyad magdhow iyo guri ka saaris.

Haddii aad dhaawacdid guriga, waa inaad magdhowdid khasaaraha kireeyaha. Dhaawaca guriga lama samaynayo ilaa kireeyuhu ka helo damaanad ah inaad bixin doontid kharashka guriga.

7.6 Masuuliyada soo sheegista khasaaraha ee saaran kiraystaha

Haddii dhaawac soo gaadho guriga, waxa muhiim ah inaad u soo sheegtid kireeyaha sida ugu dhakhsaha badan. Waxay weliba aad u muhiimtahay marka khasaaruhu uu sii badanayo haddii aan wax sida ugu dhakhsaha badan wax looga qaban, tusaale ahaan marka qasabad biyo jabto.

Waxa iyana kugu waajib ah inaad samaysid wixii aad kaga hortegi karto in dhaawacu sii bato. Haddii aad ogaatid qasabad biyo jabtay, waa inaad tusaale ahaan xidhid qasabada guud ee biyaha oo meesha ka masaxdid biyaha daatay.

Haddii aanad sheegin ama wax ka qaban khasaaraha, waxa aad masuul ka noqon kartaa magdhowga khasaaraha, waxaana dhici karta in guriga lagaa saaro.

7.7 Amar ku saabsan tabobarka guri isticmaalka iyo waxqabad la socod ah

Si lagaaga caawiyo guri degista iyo waajibaadka la socda, waxa kugu waajib ah inaad ogaalatid caawimada iyo la socodka lagama maarmaanka. Tusaale ahaan waxa lagaa caawin karaa dayactirka, talobixinta, tilmaan-siinta, waana inaad ogaalatid booqashooyin aan la soo sheegin si kireeyuhu u ogaan karo caawimada aad u baahantahay.

7.8 Wax-ka-beddelka guriga

Waa inaad ogalaatid in kireeyuhu wax ka beddelo ama dayactiro guriga.
Adigu guriga wax mak a beddeli kartid adoo ogolaansho ka helin kireeyaha.

7.9 Waajibaadka kiraystaha ee ah inuu kireeyaha u ogoolaado soo gelida guriga

Waa inaad ogolaatid in kireeyuhu soo galo guriga si uu u eego, dayactiro ama u kabo. Caadi ahaan waa in hore laguu soo ogeysiiyo.

Haddii nafta ama caafimaadka qof kale, dhismaha, ama dank ale halis ku soo foogantahay, waa inaad isla markiiba u ogolaatid inuu soo galo inkastoo laguu soo sheegin.

8. Masuuliyadda magdhowga ee kiraystaha – macnaha ay u samaynayso helida guri cusub

Haddii aanad ilaalin waajibaadyada qodobka 7, waxa kireeyuhu ku weydiin karaa magdhow.

Haddii aad heshiiska jebisid oo lagaa tuuro guriga, waxay saamayn ku yeelan kartaa inaad xilli dambe heli kartid guryaha dawladda hoose.

9. Sii kiraynta guriga (gacan labaad)

Waa madnuuc in guriga laga sii kireeyo dad kale. Sida kalena guriga kuma wareejin kartid cid kale hadaan dawladda hoose ogolaanin.

Haddii aad muddo ku meel gaadh ah maqantahay, waxa muddada aad maqantahay guriga sii isticmaali kara kireeyaha.

10. Dad kula soo dega guriga

Dad kale ma kula soo degi karaan guriga haddii aan kireeyhu ogolaan. Qodobka wuu

khuseeyaa xataa dadka kuu dhow ee ka tirsan qoyskaaga.

11. Heshiis laalista

Haddii aad ilaalin weydid qodobada heshiiskan kirada, waxa kireeyaha u banaan inuu ka baxo heshiiska. Taasoo macnaheedu yahay inaad guriga ka guuraysid isla markiiba. Haddii aad guuri weydid waxa kaa tuuri kara xafiiska qasab ku fulinta iyadoo kireeyuhu u baahnayn xukun maxkamadeed.

Haddii aad bixin weydid kirada, waxa kugu iman karta in xafiiska qasab ku fulinta kaa tuuro guriga iyadoo loo baahnayn xukun maxkamadeed.

Marka muddada kiradu dhamaato – oo aanad codsan in laguu kordhiyo wakhtiga kirada – waa inaad ka guurtid guriga. Haddii aad guuri weydid, waxa kugu iman karta in xafiiska qasab ku fulinta kaa tuuro guriga iyadoo loo baahnayn xukun maxkamadeed.

12. Guuris

12.1 Tusida guriga ka hor intaanad guurin

Marka dhammaad heshiisku soo dhow yahay, waxa kugu waajib ah inaad kiraystayaasha kale u ogolaatid eegista guriga.

12.2 Dib u soo celinta

Marka heshiisku dhammaado, waa inaad guriga ka guurtid oo aad kireeyaha u soo celisid furayaasha. Waa in guriga la nadiifiyey oo la hagaajiyey, waana inaad qaadatid dhammaan waxyaalaha aad leedahay.

12.3 Alaabta laga tegay

Haddii aad ka tegtid alaabtaada waxa dhici karta in kireeyuhu tuuro ama gado alaabta.

13. Maxkamad-degaanka

Maxkamad-degaanku waa kelmad sharci, go'aaminaysa *degaanka sharciyeed* ee kiisku hoos imanayo marka uu marayo darajada koowaad.

14. Lifaaq

Heshiiska kirada ayaa qeexaya balanta. Dhukumentigan waxa loogu talogalay keliya inuu kaa caawiyo fahanka heshiiska. Haddii dhukumentigan iyo heshiiska kiradu is khilaafsanyihiin, waxa saxsan heshiiska kirada.

Xeerka nidaamka aqalku waa qayb ka mid ah heshiiska kirada.

15. Bixinta furayaasha

Macluumaad ku saabsan tirada furayaasha ee lagu siinayo marka soo degaysid guriga.

16. Saxeexyo

Qof kasta waxa la siinayaa hal nuqul oo ah heshiiska kirada.